

**Xeer Madaxweyne 3 Novembar 1962, lamba. 264.**

**Oggolaanshaha Bankiga Qaranka Soomaaliyeed si uu u fuliyo howlaha deynta caadiga ah iyo in la qaato lana maareeyo deymaha dibadda ee dhexe iyo deynta fog.**

### **Madaxweynaha Jamhuuriyadda**

Markuu arkay qod. 85 ee Dastuurka;

Markuu tixgeliyay qod. 9 ee Xeer-Sharci 30 Juun 1960, lamba. 3, la beddelay, wax ka beddelna lagu sameeyay, oo noqday sharci 13 Janaayo 1961, lamba. 2;

Markuu tixgeliyay baahida loo qabo in loo fasaxo Bankiga Qaranka Soomaaliyeed in uu ka fuliyo hawlaha amaahda ee caadiga ah gayiga Jamhuuriyadda iyo in uu qaato oo maamulo deymaha dhex dhexaadka ah iyo kuwa fog ee ka imaanaya dibadda.

Markuu Dhagestay Golaha Wasiirada;

Isagoo ka duulaya soo jeedinta Wasiirka Maaliyadda;

### **Wuxuu Xeeriyay**

#### **Qod. 1**

Bankiga Qaranka Soomaaliyeed, si loo mideeyo nidaamka bangiyada Jamhuuriyadda, waxaa loo igmaday in uu hawlo shaqo oo bangiyeed oo firfircoon oo dano gaar ah leh uu ka sameeyo gayiga Jamhuuriyadda iyo in uu samaysto laamo u gaar ah, awoodna u siinayo in ay ku fuliyaan hawlaha aan soo sheegnay dhulalka Dawladda, go'aan kaliya oo waqti ka waqti ah ka soo baxay Guddiga Baanka sida waafaqsan faqradda 8 ee qodobka 16 ee Xeer lamba. 3, oo lagu beddelay sharciga -13 Janaayo 1961 lamba. 2.

#### **Qod. 2**

Sidoo kale Bangiga Qaranka Soomaaliyeed waxa uu awood u leeyahay in uu qaato oo uu maamulo deymaha dibadda iyo kuwa dhexe.

Muqdisho, Novembar 3, 1962.

Aden Abdulla Osman

Ra'iisul wasaaraha

**Cabdirashiid Cali Shermarke**

Wasiirka Maaliyadda

**Abdulcadir Mohamed Aden**